



## **Qorshaynta si wadista daryeel-caafimaadeedka iyo xannaanayntaada awgood, waxaan u baahan nahay oggolaanshadaada**

**Kaddib markii qofku isbitaalka laga saaro, wuxuu caadi ahaan u baahan yahay daryeelid iyo xannaanayn. Waxaad aqalkaaga ku laaban kartaa adigoo ku kalsoon inaad heli doonto taageerada aad u baahan tahay. Sidaas awgeed, waxaa wada shaqayn ka dhaxayso maamulka isbitaalka, rugta daryeel-caafimaadeedka aad ka tirsan tahay iwm.**

Qorshaynta si wadista daryeel-caafimaadeedka iyo xannaanayntaada awgood, waxaan u baahan nahay oggolaanshadaada. Macneheeda ka aqriso ereyada ku qoran afargeysta, kaddib ayaan su'aalahaaga ka jaawibi doonaa.

- Qofka adigoo kale ah oo kaddib markii isbitaalaka laga soo saaray, uu baahan sii wadista daryeelid iyo xannaanayn waa in laga hela oggolaansho. Taasoo suurtagelin doonto in maamulada isbitaalka, rugta daryeel-caafimaadeedka iwm ay is waydaarsan karaan warbixinada xiriirka la leh xaaladda cudurkaaga.
- Oggolaanshada waxay khuseeysa dhammaan wixii warbixin ah, oo xiriir la leh qorshaynta iyo tixraacida daryeel-caafimaadeedkaaga.
- Waxaad xaq ku leedahay in lagula socodsiiyo warbixinada laga bixiyay iyo dib ugu noqoshada oggolaanshada.

**Qorshaynta waxay bilaaban doontaa kaddib markii oggolaanshadaada la helo** Maamulka isbitaalka wuxuu goor dhow wargelin doonaa rugta daryeel-caafimaadeedka iwm ee aad ka tirsan tahay iyo maamulka degmada, in goor dhow laga saari doono isbitaalka. Kaddib waxaan wadajir ugu dhaqaaqi doonaa sahrinta sida ay ahaan jirtay iyo sida imminka ay tahay xaalad-caafimaadeedkaaga. Waxaa kaloo laga arrinsan doonaa haddii aad berri hore maamulka degmada ka haysan jirtay daryeelid iyo xannaanayn ama haddii aad imminka u baahan tahay kaddib markii isbitaalka laga soo saaro.

### **Waa maxay warbixinta aniga igu saabsan oo ay qaybsanayaan?**

- Xaalad-caafimaadeedkaaga – dhakhtarka rugta daryeel-caafimaadeedka ee adiga ku qaabilsan wuxuu dhakhtarka isbitaalka wargelin doonaa ama ugu sheekayn doonaa taariikhda xaalad-caafimaadeedkaaga. Kaddib wuxuu ogaan doonaa wixii dhacay, nooca daryeel-caafimaadeedka isbitaalka laga siiyay, sida caafimaadkaaga uu imminka yahay iyo sida ay tahay heerka awoodaada.
- Caawinaadda – maamulka degmada wuxuu maamulka isbitaalka siin doonaa warbixin ku saabsan caawinaadda imminka lagu siiyo adigoo gurigaagaga ku sugan, sida imminka ay tahay xaaladda caafimaadkaaga.

### **Yaa qaybsan doono warbixinta aniga igu saabsan?**

- Rugta daryeel-caafimaadeedka iwm – dhakhtarka rugta daryeel-caafimaadeedka ee adiga ku qaabilsan iyo shaqaalaha daryeel-caafimaadeedka kale ee ariintaada shaqo ku leh. Ulajeedada waxay tahay in lagu siiyo daryeel-caafimaadeedka aad u baahan tahay.
- Maamulka Dowladda hoose – hawlwadeneeyada arrintaada go'aan ka gaari doono, ee ka hawlgala xafiisyada maamulka adeegga bulshada.